

## Dhisidda bulshooyin loo dhan yahay iyo la dagaalanka midibtakoorka

Maaso 17, 2023

Dowladda Alberta waxay ku bixinaysaa \$9.5 milyan doolar barnaamijyada deeqaha si ay uga caawiso la dagaalanka cunsuriyadda iyo horumarinta dhaqamada kala duwan.

Dawladdu waxay u heellan tahay la dagaalanka cunsuriyadda iyo dhisidda bulshooyin loo dhan yahay. Si taas loo sameeyo, Wasaaradda Ganacsiga, Socdaalka iyo Dhaqamada kala Duwan waxay la shaqaynaysaa hawlgalayaasha bulshada rayidka ah ee gobolka kuwaas oo door muhiim ah ka ciyaara taageerada iyo kor u qaadista bulshooyinka dhaqamada badan ee Alberta.

Miisaaniyadda 2023 waxa ay siin doontaa \$8 milyan doolar muddo saddex sano ah barnaamijka deeqda dhaqamada kala duwan kaas oo horumarin doona isfahamka dhaqamada kala duwan. Intaa waxaa dheer, dawladda Alberta waxay bixin doontaa \$1.5 milyan doolar muddo saddex sano ah si ay u taageerto Barnaamijka Deeqaha Dhaqamada kala-Duwan iyo Ka-hortagga Cunsurinimada (MARG).

"Waa muhiim in aan sii wadno taageerada dadaallada wax ka qabashada cunsuriyadda iyo caawinta isfahamka dhaqamada kala duwan. Miisaaniyadda 2023 waxa ay bixin doontaa maalgelin lagu taageerayo hindisayaasha dhaqamada kala duwan iyo ka hortagga cunsuriyadda. Dowladda Alberta waxay sii wadi doontaa inay hesho habab cusub oo loogu sameeyo bulshooyin ammaan ah qof walba."

*Rajan Sawhney, Wasiirka Ganacsiga, Socdaalka iyo Dhaqanka*

Dhaqamada kala Duwan iyo Deeqaha ka Hortagga Cunsurinimada waxa la siinayaa ururada aan macaash doonka ahayn Alberta hindisayaasha ka hortagga cunsuriyadda iyo mashaariicda kobciya ka mid noqoshada iyo ixtiraamka. Deequhu waxay aadi karaan

taageerada dhacdooyinka dhaqanka, ciidaha, aqoon isweydaarsiyada iyo tababarka. Qof kasta oo aan faa'iido doon ahayn oo raadinaya inuu wax badan ka baro dhaqankooda waxaa lagu dhiirigelinayaa inuu codsado. Dadka asaliga ah, Inuwit (Inuit) iyo Métis, kooxaha dhaqamada kala duwan iyo kuwa caqiidada ku salaysan waxay xaq u leeyihiin inay helaan ilaa \$30,000.

Deeqaha dhaqamada cusub waxay siin doontaa maalgelinta kooxaha dhaqamada kala duwan. Deeqahani waxay taageeri doonaan isku xirka dhaqamada iyo diimaha dhexdooda, ka caawinta kooxaha dhaqamada qawmiyadaha inay joojiyaan cunsuriyadda iyo siinta dadka reer Alberta fursado ay kaga qaybqaataan oo ay ugu dabaaldegaan dhaqanka asaliga ah.

MARG iyo barnaamijka deeqda dhaqan qawmiyaadka cusub waxay dhamaystirayaan dadaallada dawladda ee jira, oo ay ku jiraan Qorshaha Waxqabadka Ka-hortagga Cunsurinimada ee Alberta.

Miisaaniyadda 2023 waxa ay sugtaa mustaqbalka Alberta iyada oo beddelaysa nidaamka daryeelka caafimaadka si loo daboolo baahiyaha dadka, ka taageeridda dadka reer Alberta sicir bararka nolosha, ilaalinta bulshooyinkayada badbaado iyo ku wadida dhaqaalaha shaqooyin badan, waxbarasho tayo leh iyo kala duwanaansho joogto ah.

## Xog la xiriirta

- Deeqaha dhaqamada kala duwan iyo ka hortagga cunsuriyadda ([Multicultural and Anti-Racism Grant](#))
- Alberta's Anti-Racism Action Plan ([Alberta's Anti-Racism Action Plan](#))

## Warbaahinta kala duwan

- Daawo wararka shirarka ([Watch the news conference](#))

## Weydiimaha warbaahinta

**Garrett Koehler**

780-554-5777

Xoghayaha Warfaafinta, Ganacsiga, Socdaalka iyo Dhaqanka